

Feb 1982
DHIMBIISHII HALGANKA IYO
KACDOONKII ARDAYDA
Dr. Ali Yusuf Duale
Yuusuf Maxamed Ciise
Saleebaan Ismaaciil Xuseen
Ismaaciil Maxamed Jaamac
Cali Yuusuf Ducaale
Axmed Sh. Cumar Sh. Ibraahim
Fu'aad Cismaan Muxumed
Maxamuud Aw Cabdi Muxumed
C/Risaaq Axmed Cilmi
C/Risaaq Ibraahim Kooshin
Axmed Maxamed Aw Cali
Feb 1982
Dhimbiishii Halganka iyo
Kacdoonkii Ardayda
Dr. Ali Yusuf Duale
Cali Cabdi Faarax
Ismaaciil Cismaan Muxumed
Cabdi Ismaaciil Muxumed
Maxamed Ismaaciil Cumar
Xasan Maxamed Aw Cali
Cali Xasan Aadan
Maxamed Baashe Sh. Cali
Cabdi Dhamac Caabbi
C/Raxiim Maxamed Baarruud
Cali Maxamuud Cismaan

# Dhimbiishii Halganka iyo Kacdoonkii Ardayda

# Feb: 20, 1982

Ali Yusuf Duale, PhD

DhimbiishiiHalganka@gmail.com

©Dr. Ali Yusuf Duale

Xuquuqda buuggan oo dhammi way ilaashantay. Dhiganahan qayb ka mid ah iyo isaga oo dhamaystiran midna waxba lagama doorin karo, dibna looma daabacan karo (dhammaantii amma qaybo ka mid ah), loomana adeegsan karo ujeeddo ganacsi, sinabana looguma tagrifali karo, iyada oo aan ogolaashiyo qoran laga haysan qoraaga.

Daabacadda 1aad, 2022

Hargeisa, Somaliland

Waxa daabacday: Sagaljet Printing

Hargeisa +252-634671179

wardoonpublishing@gmail.com

Info@wardoonpublishing.com

DhimbiishiiHalganka@gmail.com

ISBN:

DhimbiishiiHalganka@gmail.com

# Tusmada Buugga

**Mahadnaq** viii

**Weedha Tifatiraha** x

**Nuxurka Buugga: Faalooyin** xii

**Hordhac** xvii

**Sida Buuggu U Kala Qaybsan Yahay** xx

**1. Somaliland Gumaysiga Ka Hor** 1

**2. Gobanimo Doon** 3

**3. Xorriyaddii: June 26, 1960** 10

**4. July 1, 1960 Iyo Midowgii** 14

4.1. Saluuggii Midnimada 15
4.2. Aftidii Loo Qaaday Midowgii 19
4.3. Isku Deygii Inqilaabka: Dec. 1961 20

**5. Afgembigii Oct 21, 1969: Dowladdii Milateriga Ahayd** 24

5.1. Maxkamadda Badbaadada Dalka 29
5.2. Hay'addii "Nabad" Suggida - National Security Services (NSS) 32
5.3. Hantiwadaagga Cilmiga Ku Dhisan 33
5.4. Indheer Garadkii Oo Farta Ku Fiiqay Galdaloolooyinkii Dawladdii Milatariga Ahayd 40
5.5. Waxdaddii: Horumarinta Diinta iyo La Dagaalanka Ilxaadka 43
5.6. Djibouti: Gobanimo Doonkii iyo Xorriyaddii 46
5.7. Dagaalkii Itoobiya iyo Soomaliya iyo Raadadkiisii 47
5.8. Halgannadii Hubeysnaa 50
5.9. Boobkii Lagu Hayay Hantida Dadweynaha 52

**6. Dhacdooyin Raadayn Lahaa** 55

6.1. Xadhiggii Saraakiisha 55

6.2. Jebintii Jeelka Madheera 55
6.3. Furashadii Kornayl Cabdillaahi Askar 56
6.4. Soo Galkii Buuraha 56
6.5. Afduubkii Diyaaraddii Somali Airlines 57

**7. UFFO 59**

7.1. Xadhiggii UFFO 61
7.2. Jidhdilka 63
7.3. Xukunkii UFFO 65

**8. Hordhacyadii Kacdoonka Ardayda 67**

**9. Bilowgii Kacdoonka: Feb 20, 1982 78**

9.1. Dhagaxtuurkii iyo Abwaanadu Siday U Cabbireen 86
9.2. Sannad Guurooyinkii Feb 20 88

**10. Dhallinyartii Loo Maxkamadeeyay Abaabulkii Iyo Horkicii Kacdoonkii Ardeyda 90**

10.1. Maxkammaddii Iyo Qaybihii Ay Ka Koobnayd 93
10.2. Xukunkii: Oct 3, 1984 95
10.3. Xabsiga Madheera 97
10.4. Suugaanta Xabsiyada Laga Tiriyay 102

**11. Cali Yuusuf Ducaale 114**

11.1. Shaqo-Qaran 119
11.2. Bilowgii Jaamacadda 121
11.3. Xadhiggii 122
11.4. Xukunkii 126
11.5. Xusuuso 131
11.6. Saamaxaad 134
11.7. Dib Ugu Noqoshadii Jaamacadda 137
11.8. Ka Bixitaankii Soomaaliya 138
11.9. Markhaatifur: Muxumed Liiban Maxamed 139

**12. Yuusuf Maxamed Ciise 155**

12.1. Ka Dhicitaankii Jeelka: Cabdi Daahir Caynaanshe 170

**13. Cabdirisaaq Axmed Cilmi 176**

**14. Cali Maxamuud Cismaan 185**

**15. Fu'aad Cismaan Muxumed 191**

**16. Axmed Sh. Ibraahim Sh. Cumar 199**

**17. Ismaaciil Maxamed Jaamac 204**

**18. Maxamuud Aw Cabdi Muxumed 209**

**19. Cali Cabdi Faarax 213**

**20. Cabdi Ismaaciil Maxamuud 216**

**21. Cabdirisaaq Ibraahim Kooshin 224**

**22. Cabdiraxiim Maxamed Baaruud 233**

**23. Cali Xasan Aadan 236**

23.1. Gacan Libaax 241
23.2. Gelbis 242
23.3. Dardaaran 248

**24. Maxamed Baashe Sh. Cali 251**

**25. Axmed Maxamed Aw Cali 259**

**26. Xasan Maxamed Aw Cali 263**

**27. Saleebaan Ismaaciil Xuseen 265**

**28. Ismaaciil Cismaan Muxumed 268**

**29. Maxamed Ismaaciil Cumar 270**

**30. Cabdi Dhamac Caabbi 272**

**31. Xadhigga Iyo Saamayntiisii 275**

**32. Xusid: Dhallinyaro Ka Qayb Qaatay Kacdoonka 277**

32.1. Axmed Abokor Cabdillaahi 277
32.2. Cali Muuse Jaamac & Mataan Maxamuud Cumar 281
32.3. Maxamed Cabdi Maax (Koos) 286
32.4. Maxamed Yuusuf Bidhiidh (Badda) 290
32.5. Fu'aad Sheekh Abuubakar 297

**33. Haweenka Iyo Kacdoonkii 300**

**34. Gunaannad 303**

**35. Xigasho 315**

# Mahadnaq

Marka hore, waxa mahad oo dhan iska leh Allaha (SWT) ii suurta geliyay qoraalka iyo isuduwidda buuggan mahadhooyinka xambaarsan.

Marka xiga, waxan aad ugu mahad celinayaa cid kasta oo gacan ka geysatay qoritaanka buuggan, hadday noqoto xog ururin, talooyin, iyo tifatirba; Ha ugu horreeyaan dhammaan inta maanta ka nool 20-kii dhallinyaro ee loo maxkamadeeyay kacdoonkii ardaydu hor kacaysay, oo si sharafle iila qaatay, iguna dhiirri geliyey, inaan bilaabo buuggan qoristiisa. Waxan si gaar ah ugu mahad naqayaa Yuusuf Maxamed Ciise oo waqti aad u badan si hagar la'aana u geliyay soo saaridda buuggan, hadday noqoto talo bixin, xog ururin, amma tifatiridba. Yuusuf waxa kaloo uu qayb wayn ku lahaa allifaadda magaca buuggan. Waxa kale oo aan u mahadnaqayaa Prof. Cabdiraxmaan Yuusuf Abokor oo isna sixitaanno fara badan iyo talo siinba ku darsaday buuggan.

Waxanan iyana ilaawi karin talooyinkii dhaxalgalka ahaa ee ay i siiyeen Dr. Jaamac Muuse Jaamac iyo Boobe Yuusuf Ducaale. Maxamed Cabdi Maax (Koos) ayaan uga mahad celinayaa sida qurxoon ee uu gabayga milgaha badan ugu suureeyey nuxurka fariinta uu buuggani xambaarsan yahay. Waxan isna mahad iga mudan Fu'aad Cismaan Muxumed oo xagga xusuusta Alleh ka asturey, la'aantiina magacyo fara badan oo maankeyga ka gedmey aanan haweysteen dib u heliddooda.

Asmahaan Cabdillaahi Cilmi oo waqti badan gelisay farshaxanka, sargoynta iyo nashqadaynta jaldiga buugga ayaa iyana iga mudan mahad celin. Waxa iyana xusid mudan Salma Cali Yuusuf Ducaale oo alliftay sargoynta suuradaha buugga ku xardhan.

Waxan iyana mahad mudan maamulka iyo shaqaalaha *Sagal Jet* oo si sharaf leh uga howl galay soo saaridda buuggan. Waxa kaloo aan xusayaa talooyinka iyo tilmaamaha ay Istaahil Maxamed Yuusuf iga siisay sidii loo soo bandhigi lahaa buuggan.

Waxaanan illoobi karin samirkii iyo dhiirri galintii ay muujiyeen xaaskayga, Katuun Xirsi Roobley, iyo carruurtayda oo iga furtay howlo badan (oo waajib igu ahaa inaan qabto) muddadii dheerayd ee aan qorayey buuggan.

Ugu dambayn, waxaan duco iyo mahadnaq u dirayaa boqolaalkii qof ee ii suurto galiyey sidii aan u heli lahaa aqoon aan naftayda iyo dadkaba ugaga faa'iideeyo. Kuwaas oo ay ugu horreeyaan ayeyday Xaliimo Ibraahim Yuusuf, abtiyaaladay, labadayda waalid iyo dhammaan macallimiintii wax i baray.

DhimbiishiiHalganka@gmail.com

# Weedha Tifatiraha

Sida cinwaankuba dhigayo, buuggani wuxu iftiiminayaa kaalintii uu kacdoonkii ardeydu ku lahaa halgankii soo dhicinta xornimadii Somaliland ee luntey 1960-kii. Wuxu ku halqabsanayaa labaatan dhalinyaro ah oo siddeed iyo toban ka mid ahi ardey ahaayeen; Dhalintan qaarkood dil iyo daldalaad ayay ku muteysteen kacdoonkaas, qaarna xidhig iyo madaxaa ha ku furto.

Buuggu wuxu si kooban u baadigoobayaa sooyaalkii kacdoonkan curiyey, iyo waayo nololeedkii ay dhalinyaradani ku hanaqaaddey. Muuqaal dareen huwan ayuu kaa siinayaa daruufihii adkaa ee hor yaalley dhallintan iyo dadweynahaba, iyo sidii ay uga falceliyeen.

Ifka iyo aakhiro dhul u dhaxeeya, oo haddana suuqaq iyo magaalooyin leh, ayuu kula tagayaa - waa xabsiga’e! Dareenka qof dil suge ah, iyo qaar madaxaa ha ku furto ku xukuman ayuu wax kaala wadaagayaa.

Inta aanad xabsiga gaadhin, buuggu wuxu qaddar kugu sii yara hakinayaa maxkamaddii waddanka ugu sarreysay, Maxkamadda Badbaadada Dalka, taas oo kuu suurto galineysa in aad in yar ka milicsato habka ay maxkamaddaasi wax u xukumi jirtey.

Sidoo kale, maxkamadda ka hor, waxad si buuxda iyana wax uga ogaan doontaa habkii dambibaadhista loo samayn jiray xiligaa; Waxad wax ka baran doontaa hay’adihii dambibaadhista, sida NSS-ta, Hangashta, iyo Dhabar Jebinta, iyo waliba qaabkii ay dadka ula dhaqmi jireen.

Kenni adeyga aadamaha, la qabsiga iyo la noolaanshaha waayaha adag ayuu wax ka tibaaxayaa buuggu. Jirribaadda iimaanka iyo yaqiinta Alleh ee qofka ayuu kuu bidhiiqinayaa. Rajadda beenta ah, ta runta ah, iyo quusta oo meel daris ku wada ah ayaad arkeysaa.

Markii u horreysey taariikhda xabsiga Madheera ee ay koox maxaabiisi iska jabiyaan, ayuu halxidhaalaheeda kuu ibofurayaa. Furashadii jeelka ee SNM ayaa haddana kuugu xigeysa.

Wuxu tix iyo tiraabba buuggu ku tilmaamayaa, isaga oo u dardaarwerinaya dadweynaha guud ahaan, gaar ahaana dhalinyarada, in ay ummadi meel gaadhi karto oo kaliya, marka aan loo kala tagin, Alleh la tallo saarto, caqliga iyo xoogga la xalaal maalo, loo sahan dayo geeddi socodka ummadeed, dhib iyo dheef loo sinaado, la tudhaaleysto, loo hagar baxo, oo loo hoggaan xusho. Murtida ka sokow, isaga oo cuskanaya Ayaadka Qur’aanka, iyo sheekooyin ka caan baxey dunnida oo dhaxal reeb noqdey laguna qorey boqolaal af, ayuu fariintiisa iyo fikirkiisaba si farshaxan badan kugu soo gudbinayaa.

Dhibka iyo dheefta dawlad xumi leedahey ayuu ku durdursiinayaa. Inaan madaxbanaanni, iyo dawladnimo, hadiyad lagu bixin, laguna helin, ayuu duruus adag kuugu dhigayaa. Iney dumin qaran fudeyd tahey, bal se dhisiddeedu adag tahey, ayuu kaa tuhun saarayaa.

Sida kale, wuxu buuggani wax dheeryahey qalin anshax iyo hufnaan badan.

Yuusuf Maxamed Ciise

DhimbiishiiHalganka@gmail.com

DhimbiishiiHalganka@gmail.com

# Nuxurka Buugga: Faalooyin

*Dhimbiishii Halganka iyo Kacdoonkii Ardayda* waa buug aad u qiimo badan oo la qoray waqtigiisii, si wadareedna u koobaya dareenkii ardaydoo dhan. Annagana Uffo ahaan hiil aan la illaawi karin ayuu noo ahaa dareenkaas Dr. Cali ka warramayaa.

*Maxamed Baaruud Cali*

<>><><><><><><><><><><><><><><>

*Dhimbiishii Halganka iyo Kacdoonkii Ardayda*: waa buug xambaarsan taariikh iyo dhacdooyin murugo leh. Tafsiirka taariikhda waa la isku khilaafi karaa, hase yeeshee dhacdooyinka taariikhiga ah la iskuma khilaafi karo. Waxaan muran ku jirin in dhacdooyinka taariikhiga ah ee buuggani soo bandhigayaa (iyo kuwa kaleba) ay horseedeen halgankii iyo kacdoonkii ummaddu kala hortimid taliskii milatariga ee macangagga ahaa. Waxa qoraaga buuggu, Dr. Cali Yuusuf Ducaale, si tifaf-tiran uga sheekeeyay dhacdooyinkaa taariikhiga ah. Waxa lama huraan ah in da'yarta maantu ay ku baraarugsanyihiin diintooda, taariikhdooda, iyo dhaqankooda. Sida ku xusan cutubka ugu dambeeya ee "Gunaanad", wuxu buuggu waanooyin dhaxal-gala ujeedinayaa da'yarta, madaxda, ganacsatada, iyo culimada.

*Prof. Cabdiraxmaan Yuusuf Abokor*

<>><><><><><><><><><><><><><><>

Buuggan oo magaciisu yahay *Dhimbiishii Halganka iyo Kacdoonkii Ardayda* waxa ku fara yaraystay Cali Yuusuf Ducaale. Buuggani wuxuu soo tebinayaa dhacdooyinkii dhacay bishii Feb 20-keedii, 21-keedii, 22-keedii ee 1982-kii, iyo kuwii kale ee la midka ahaa. Kacdoonkaas oo markii hore si baahsan uga dhacay Hargeysa, markii dambana ku fiday magaalooyin kale, ayuu Cali ka qoray buuggan taariikhiga ah ee inna horyaalla.

Cali wuxuu ka mid ahaa da'yartii markaa kacaysay, goob joogga iyo xogogaalka u ahayd, sida buuxdana uga qayb qaatay abaabulkii kacdoonkaas. Muddaaharaadadaa iyo kacdoonkaas oo ardeyda iyo dadweynuhu kaga hor tegeen taliskii Maxamed Siyaad Barre ee duudsiga, xasuuqa, dabar goynta, iyo waxyaabo badan oo bani-aadamku aanu geyin kula kacay shicibkii ku noolaa goboladii Woqooyi, gaar ahaan magaalooyinka Hargeysa, Burco iyo qaar kaleba. Waa maalmihii Hadraawina ka tiriyey maansadii odhaneysay:

*Hambaabir dhawaanta*
*Hawraar iyo maanso*
*Dagaal wata heeso*
*Hiddey u laheyde*
*Hargeysi ma toostey*
*Harqoodka ma tuurtey*

*Cali isagoo la kaashanaya intii ka nool dhallinyartii lala xidhay ayuu innala wadaagayaa wixii ay ka xasuustaan Kacdoonkaas oo hadda waqti badani ka soo wareegay; Sidan filayo, kana muuqata buugga, in muddo ah ayaa qoraalkan taariikhiga iyo dhaxal galka ah la soo xog ururinayay.*

Cali Yuusuf Ducaale waxaynu uga mahad celinaynaa taariikhdan qaaliga ah ee uu ummadda Soomaaliyeed gaar ahaan shacabka Somaliland uu u soo ururiyay; Ilaahay (SWT) ha ka abaal mariyo dadaalkaas, innagana Ilaahay haynooga dhigo mid aynu wax ku qaadanno, oo aynu uga tagno ubadkeenna, iyaguna ubadkooda uga tagaan. Inteenna nool waxa innala gudboon, inta aynaan dhiman, in wixii aynu ku kaabi karno ku kordhinno.

*Boobe Yuusuf Ducaale*

<>><><><><><><><><><><><><><><>

Waxan cid walba (gaar ahaan dhallinyarada reer Somaliland) ku dhiirri galinayaa inay dhuuxaan, oo ay dheefsadaan taariikhaha ku duuggan buuggan. Waa markii ugu horeysey ee si mug leh loo dhiteeyo soyaalkii Kacdoonkii Ardeyda.

*Prof. Siciid Budle*

<>><><><><><><><><><><><><><><>

*Dhimbiishii Halganka iyo Kacdoonkii Ardayda* waa buug ay ku duugan tahay taariikhdii kacdoonka ardaydu ka bilowday magaaladda Hargeysa bishii February 1982 kii. Anigu ardaydii iskuulka Faarax Oomaar ee ay qoraaga isku kalaaska ahaayeen baan ahaa. Qoraaga, oo ka mid ahaa ardaydii xadhiga dheer iyo dilka ku mutaystay kacdoonkaas, waa shakhsi xogogaal ah oo taariikhdii halganka si hufan u soo gudbinaya.

*Jamaal Cali Xuseen*

<>><><><><><><><><><><><><><><>

Buuggan uu Dr. Cali Yuusuf Ducaale innoo soo bandhigay wuxu

si dhab ah uga turjumayaa waaqicii taagnaa xilliyadii uu Kacdoonka Ardaydu ka bilaabmay Hargeysa, Burcana si degdeg ah isku barbar taagtey ardayda iyo dadweynaha reer Hargeysa. Markii aan u fiirsaday qoraalada ku dhigan buuggan iyo farriimaha uu dirayo, waxan isku dayey inaan tix gabay ah ku cabbirro dareenkayga; Waxan idhi:

*Dhanbaal weeye buuggani Caloow Dhibicda roobaad'e*
*Da'yartuu dhigaal culus u noqon Dhud iyo taariikh'e*
*Wedku waayo dhaafyoow runtii Waan ku dhaashaday'e*
*Dharaarii qadhaadhaa haddaan Dhowr ka yara sheego*
*Anoon hadalka dheerayn haddaan Dhiibto arar gaaban*
*Aan ku soo dhawaadee akhriya Dhaxal-gal weeyaane*
*Bulshadeena oo dhaqan markii Dhugasho loo yeeshay*
*Dhakhtar iyo markii macallimiin Dhebiga loo qoolay*
*Odayada markii loo dhurtiyo Dhaca tijaarteena*
*Hablaheena dhaladka ah markii Dhaqasho loo diiday*

*Dhar xariir ah iyo maalintii* *Suufka laga dhaarshay*
*Dhalinyariyo waayeel markii* *Layna dhabanaanshay*
*Maalintii dhulkeennii la yidhi* *Qirinqir soo dhooba*
*Aan dhimasho mooyee la rabin* *Nolol dhamaanteenba*
*Sowtuu Ilaahay ka dhigay* *Dhinac kaloo guul ah*
*Dhirifkii Hargaysiyo markaan* *Dhagaxa tuuraynay*
*Ee geeri waa loo dhashaye* *Galowgu dhiillaabay*
*Dhamacdii rasaastiyo markaan* *Dhiraha jiidhaynay*
*Maalintii Burcoo dhaarsanayd* *Dhaabadaha qaadday*
*Wixii dhiig lahoow kaca markii* *Lagudhawaaqaayay*
*Dhinbiishii kifaaxiyo markay* *Dhuxushu qiiqaysay*
*Waatuu kacdookii dhacee* *Laysku dhaarsadaye*
*Dowladdii dhamayd maalintii* *Laga dheg roonaaday*
*Maalintii raggii dhiirranaa* *Faqashta dhaadhyeeyay*
*Dhagidaan xasuustaa wixii* *Dhacay Ducaaloowe*
*Dhammaad noqotay Caliyoow* *Rajadii dhiigga loo huraye*
*Ururkaan dhisnaa noo ahaa* *Dhaawac-tire wayn'e*
*Waxa aan dhufaysyada ka qodo* *Qaaxo dhinaceeda*
*Aan dhowrta joognaba nabsigu* *Talada noo dhiibye*
*Aynu dhowrsannoo yaan sidii* *Dhahar la xoog sheegan*
*Dhexna aan u noqonno oo shacbiga* *Yaan la kala dheegin*
*Dheef iyo haddii ay dhib tahay* *Dhiil ku wada maala*
*Ratigeennan dhaanka ah dadyoow* *Dheelli ka ilaasha*
*Haddii uu cadligu dhuunta galo* *Dhereg ku maanshooda*
*Diintana beryaa laga dhamcee* *Dhuuxa ka islaama*

*Maxamed Cabdi Maax (Koos)*

DhimbiishiiHalganka@gmail.com

# Hordhac

Sidaan wada ogsoonahay nolosha marna howli kama dhammaato. Maalin kasta waxaynu la daallaa dhacnaa arrimo iyo howlo u baahan in laga falceliyo, in la hormariyo, ama kuwo innagu soo fool leh, oo u baahan in loo tabaabulshaysto. Dhinaca kale, haddaan ka eegno, ayaamuha wuxun bay u kala baxaan qaar kuugu muuqda inay kugu adag yihiin, iyo kuwo badhaadhe ah oo lagaba yaabo inay ku illowsiiyaanba waajibaadkaaga. Dhacdooyinka kala gadisan ee soo mara shakhsi ama mujtamac iyo falcelintooduba waxay ku duugmaan buuggaagta sooyaalka ee qof ama se bulsho gaar u leedahey.

Soyaalku wajiga uu doonaba ha yeeshee, waa dhacdooyin isu tegay oo laga yaabo qofba inuu dhan ka eego; Hase ahaatee, dheefta kaliya ee ay taariikhdu leedahay, waxan odhan karnaa, waa in wax laga barto.

Buuggan oo uu cinwaankiisu yahay "Dhimbiishii Halganka iyo Kacdoonkii Ardayda: Feb 20, 1982", wuxu si kooban uga warramayaa taariikhihii dhacdooyinkii halgameed ee ay soo martey Somaliland. Gaar ahaan buuggu, sida cinwaanka ka muuqata, wuxu iftiimin doonaa maalin ka mid ah maalmaha ugu magaca dheer ee soo maray Somaliland - waa Feb 20, 1982-kii oo ahayd maalintii dadweynaha reer Hargeysi codka dheer ee diidmada ah, ee gabashadu ka reebaneyd, ay sida qayaxan ugu direen dowladdii mileteriga aheyd ee Siyaad Barre iyo caalamkaba. Waxay maalintaa muujiyeen dadweynuhu inay diyaar u yihiin inay naf iyo maalba hurayaan si ay dulmigii ku habsadey iyo heeryadiisiiba isaga rogaan.

In kasta oo uu marka hore buuggu si kooban u dul mari doono taariikhihii kala duwanaa ee ay Somaliland soo martay, cashar taariikheedna u noqon doono gaar ahaan dhalinyarta, haddana, nuxurka buuggu wuxu yahay inuu shaaciyo kaalinta ay dhallinyaradu, gaar ahaanna ardayda dugsiyada sare, ku lahaayeen kacdoonkii reer Somaliland kaga soo horjeesteen xukunkii milateriga ahaa ee uu hoggaaminayay Maxamed Siyaad Barre.

Buuggan waxad ka akhrisan doontaa saamaynta ay howshaasi ku yeelatay dhallinyaradaa noloshoodii, iyo waliba kuwii ehelkooda; Si gaar ahna, buugu wuxu xusi doonaa 20 dhallinyaro ahaa (oo 18 ka midi arday ahaayeen) oo xukunno dil, xabsi daa'im iyo xadhig ahaa ku mutaystay doorkii ay ku lahaayeen kacdoonkaa bilaabmay Feb 20, 1982.

Buuggu wuxu si faahfaasan u soo bandhigi doonaa dhacdooyinkii muddaharaadadii lagaga soo horjeestay xukunkaa kali-taliska ahaa ee Siyaad Barre. Sidoo kale, wuxu buuggu soo gudbin doonaa sida dhallinyartaasi ay ugu badheedheen, abaabulka, ka qayb qaadashada, iyo hoggaaminta kacdoonkaa. Wuxu iyana buuggu xusi doonaa sheekooyin ay ina la wadaagi doonaan qaar ka mid ah dhallinyaro kale oo kacdoonka door wayn ka ciyaaray, balse ka badbaaday in loo maxkamadeeyo.

Ugu dambayn, buuggu wuxu baaq kooban u soo jeedinayaa dhallinyarada, masuuliyiinta dowladda, culimaa-udiinka, baayacmushtarka, iyo guud ahaanba bulsho weynta.

Buuggan waxan ka ilaalin doonaa, intii karaankayga ah, xusidda magacyada aan wax faa'iido ah buugga ku soo kordhinayn. Dabcan meelaha qaar waxa lagama maarmaan ah in magacyo la xuso. Waxa iyana buugga ka maqan wixii naanays taban ah, ciddii doontaaba ha lahaatee. Sidoo kale, waxa qoraalka buuggu ka hufan yahay xusidda qabiillada – marka laga reebo marar kooban oo gabayo aan soo qaatay magacyo qabiil lagu xuso. Dad badan oo magacyadooda lagu xusayo buuggan ayaa maanta innaga hooseeya, kuwaas oo inaga mudan inaan u ducayno: si guud ayaynu hal mar dhammaantood Alle (SWT) uga baryeynaa innuu Jannatu Fardowsa ka waraabiyo.

Sawirada aan isticmaalay waxan ku dadaaley in aan helo midba midkuu uga dhawaa xilligii kacdoonka; Taas oon mar walba ii suurta gelin, laba sawirna inaan helo waan "awoodi kari waayay".

# Sida Buuggu u Kala Qaybsan Yahay

Marka hore waxaynu si kooban uga hadli doonnaa taariikhda Somaliland gumaysiga ka hor; yaa xukumi jirey iwm? Intaa ka dibna waxaynu yara taa-taaban doonnaa wajiyadii kala duwannaa ee gobannima-doonku soo maray, sida dagaaladii hubaysnaa ee Ingiriiska lagaga soo horjeeday, halgankii xagga siyaasadda iyo kii suugaanta ahaaba.

Hanashadii xorriyadda ee dhacday 26 June 1960, farxadihii iyo shucuurkii maalintaas la muujiyay ayaynu ka yara hadli doonnaa iyana.  Waxa kaloo aynu raacin donnaa sidii dhakhsaha ahaa, ee aan ka fiirsiga lahayn, ee loo abaabulay midowgii labadii waddan ee ka kala xoroobay Ingiriiska iyo Talyaaniga.

Waxaynu ka jawaabi doonnaa su'aasha odhanaysa goormay reer Woqooyigii ka soo jeedey dalkii Somaliland saluugeen la midowgii dalkii Soomaaliya? Waxyar ayaynu ka sheegi doonnaa halgankii loo soo maray xoreynta Djibouti inagoo is waydiinayna maxay Djibouti ula midoobi weyday Soomaalidii kale?

Dhiciddii afgambigii milateri ee Oct 21, 1969, ayaynu isna ka hadli doonnaa. Waxana aynu xusi doonnaa qiimayntii horta lahayd ee indheergaradku ka bixiyay taliskan milateriga ah. Ku talo galkii dawladdan militarigu ku talo gashey in diinta hoos loo dhigo, iyo xarakaad taa cakis ku ahaa, sida ururkii Waxdadda oo kale) raadkii ay ku yeesheen kor u soo qaadidda, barashada, iyo ku dhaqanka diinta Islaamka, ayaynu iyana dul mari doonnaa.

Waxa intaa ku xigi doona hanaqaadkii mucaaradyo taliskii milatariga ka soo horjeeday oo ka koobnaa siyaasiyiin, saraakiil ciidan, aqoonyahanno iyo, dabcan, arday iyo shicibka guud ahaanba. Waxaynu is dul taagin doonnaa bar bilowgii kacdoonkii shicibka iyo siduu ku bilaabmay.

Waxeynu ku xigsiin doonnaa waayihii ay soo mareen dhallinyaradii ardayda u badnaa ee loo maxkamadeeyay horkaca iyo abaabulka kacdoonkaa shicibka. Sheekooyin ay ku jiraan xadhig, jidhdil, maxkammad, xukunno iyo waaya aragnimo qoto dheer ayuu buuggu innoo soo bandhigi doonaa. Intaa ka dib, buugga waxaynu ku soo khatimi doonnaa qaybta gunaanadka.

Wixii faahfaahin amma dalab ah, la soo xidhiid:

DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com
DhimbiishiiHalganka@gmail.com

We highly expect that you will find this book interesting and worthwhile reading

***Prof. Siciid Budle:*** *Waxan cid walba (gaar ahaan dhallinyarada reer Somaliland) ku dhiirri galinayaa inay dhuuxaan, oo ay dheefsadaan taariikhaha ku duuggan buuggan. Waa markii ugu horeysey ee si mug leh loo dhiteeyo sooyaalkii Kacdoonkii Ardeyda.*

***Yuusuf Maxamed Ciise (Tifatiraha Buugga):*** *Dr. Cali Yuusuf Ducaale wuxu Alleh garan siiyey in uu weeleeyo taariikhdii Kacdoonka Ardeyda oo inaga dayacneyd muddo dheer. Waxan u arkaa arrin loo haraad qabey, oo waliba wax weyn ka tari doonta dhiiri galinta da'yarta maanta. Taariikhda ka sokow, buuggu wuxu dhallinyarada ku dhiirigelinayaa inay noqdaan qaar yeesha aqoon, karti, bisayl siyaasadeed, wadaniyad iyo dadnimo u suurta galiya iney caalamka wax la qeybsadaan.*

***Prof. Cabdiraxmaan Yuusuf Abokor:*** *Waa buug xambaarsan taariikh iyo dhacdooyin murugo leh oo ka mida dhacdooyinkii horseeday halgankii iyo kacdoonkii ummaddu kala hortimid taliskii milateriga ahaa. Dr. Cali Yuusuf Ducaale wuxu si tifaf-tiran uga sheekeeyay dhacdooyinkaa. Sida ku xusan cutubka ugu dambeeya ee "Gunaanad", wuxu buuggu waanooyin dhaxal-gala ujeedinayaa da'yarta, madaxda, ganacsatada, iyo culimada. Waxa lama huraan ah in da'yarta maantu ay dhugtaan waanooyinkaas, noqdaanna qaar ku baraarugsan diintooda, taariikhdooda, iyo dhaqankooda.*

***Maxamed Baaruud Cali:*** *Dhimbiishii Halganka iyo Kacdoonkii Ardayda waa buug aad u qiimo badan oo la qoray waqtigiisii, si wadareedna u koobaya dareenkii ardaydoo dhan. Annagana Uffo ahaan hiil aan la illaawi karin ayuu noo ahaa dareenkaas Dr. Cali ka warramayaa.*

***Boobe Yuusuf Ducaale:*** *Dr. Cali Y. Ducaale waxaynu uga mahad celinaynaa taariikhdan qaaliga ah ee uu ummadda Soomaaliyeed gaar ahaan shacabka Somaliland uu u soo ururiyay; Ilaahay (SWT) ha ka abaal mariyo dadaalkaas, innagana Ilaahay haynooga dhigo mid aynu wax ku qaadanno, oo aynu uga tagno ubadkeenna, iyaguna ubadkooda uga tagaan. Inteenna nool waxa innala gudboon, inta aynaan dhiman, in wixii aynu ku kaabi karno ku kordhinno.*

***Jamaal Cali Xuseen:*** *Dhimbiishii Halganka iyo Kacdoonkii Ardayda waa buug ay ku duugan tahay taariikhdii kacdoonka ardayda. Qoraaga, oo ka mid ahaa dhallinyaradii xukun dil iyo xadhig dheer ahaa ku mutaystay kacdoonkaas, waa shakhsi xogogaal ah oo taariikhdii halganka si hufan u soo gudbinaya.*

9 781513 696362